# Erayga iyo Maanta Somtwt 0206
## DHARAAR CAD

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqli jirteen saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay **DHARAAR CAD**. Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan **DHARAAR CAD**, aynu halkan ku lafa-gurayno. Balse intaynaan idiin billaabin aynu wada dhegaysanno qasiiddadan.

**SONG: CD 10—CUT 1**

Dhalashadii Ciise waxay ka ahmiyad ballaaran tahay dhacdo taariikheed kasta ee dadku leeyahay. Waa dhacdo awood leh oo ka qaalisan dhacdo kasta ee lagu xusuusto guulaha dadku ay gaareen. Xaqiiqdii waa sida dab oo kale, oo inkasta oo uu yar yahay haddana saamayntiisu ay gaari karto meel fog ama aadan qiyaasi karin.

Waxaa haddaba la mid ah, imaanshihii Ciise dunida yimid, isagoo gaban ahna ku dhashay Beytalaxam sannado badan ka hor, waxaana saamayntiisu gaartay dhul baaxad weyn. Maaddaama uu ahaa Wiilka Aadanaha, Ciise wuxuu lahaa awood rabaaninimo. Rasuul Yooxanaa ayaa suugaan qiimi leh ku cabbiray arrinka sida ku qoran Injiilka Sida Yooxanaa u qoray cutubka 1aad.

Bal aynu dhegaysanno sida rasuulku u sifeeyey Ciise sida ku qoran Injiilka uu qoray ee Yooxanaa markaasoo uu lahaa, "Bilowgii waxaa jiray Hadalka." Wuxuuna isticmaalayaa isla hadalladii

loo isticmaalay abuurniinta sida ku qoran kitaabka Bilowgii. Markaasina waxaan doonanaa inaad fahamtaan erayga **"Hadalka"** haddii far waaweyn laynoogu qoray—wuxuuna eraygu u taagan yahay Ciise. Markaas wuxuu leeyahay, **"Bilowgii waxaa jiray Hadalka, Hadalkuna wuxuu la jiray Ilaah, Hadalkuna wuxuu ahaa Ilaah."**

Waxaa halkan lagu muujinayaa tafaasiil toos ah oo khusaysa rabaaninimada Masiixa, oo waxaa la leeyahay, **"Wuxuu la jiray Ilaah bilowgii".** Bal aan idiin akhriyo haatanna Injiilka sida Yooxanaa u qoray 1:3, waxaana qoran sidatan:

**"Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis. Isaga waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay ahayd nuurka dadka. Nuurkuna wuxuu ka ifayaa gudcurka, gudcurkuna kama badin."**

Markii bom qarxo ayaa waxyaalaha uu sii daayo waxaa ka mid ah tamar, sida iftiin iyo kulayl. Waxa aynu haddaba aayadahan ku arkayno waxay tahay in Ciise yimid dunidan isagoo wata awoodda Ilaaha Qaadirka ah. Wuxuu ahaa sida la malayn karo bombaanadii nabaadiinada. Balse Ciise dunida uma iman inuu burburiyo, balse waxaa dunida burburiya kelitaliyayaasha, hoggaamiyayaasha ciidamada iyo madaxda diimaha.

Ilaah xigmaddiisa darteed ayuu inagu siiyey Ciise Masiix si uu innaga inoo badbaadiyo. Waana awood wax badbaadisa oo dadka soo furata intii ay baabi'I lahaayeen. Dhacdada dhalashada Masiixa way ahmiyad ballaaran tahay oo waxay leedahay saamayn baaxad leh oo samaawi ah! Ciise waa badbaadiye caam ah. Markaasina imaanshihiisii iyo dhalashadiisii aadminimo ee hoosaysay loo nisbayn karin awoodda iyo maamuska dhacada dhalashadiisa.

saamaynta weyn leh. Markii aan ka fakaray faalladan laga bixiyey Ciise ee ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray cutubka kowaad ee lagu sifeeyey Masiixa sida iftiinka Ilaah, ayaan yara milicsaday sharciyada ama qawaaniinta aasaasiga u ah jiritaanka koonka. Sida sharciga cuf-soojiidka. Culimada Saynisku garan maayaan ilaa iyo maanta maaddada cufsoojiidka ama gravityga sida ay u shaqayso.
Waxaa kaloo jira sharciga kale ee thermodynamics ee ah in waxwaliba bilowgooda ay si wanaagsan u shaqeeyaan, oo markii ay gaboobaan inaanay sidoodii hore noqonaynin. Waxaad eegtaa gawaarida aan lagu shaqanin ee garashka layska dhigo, wakhti kaddib way daxalaysanayaan, waanay kala daadana-yaan. Waana sharciga ahaanshiyaha walxaha jiri-taankooda.
Sharcigaasuna waa in wax waliba duqobaan oo daxalaystaan waxaana afka Ingiriisiga lagu yiraahdaa, Thermodynamics. Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadka reer Rooma 8:1-2 ayaa waxay leedahay, iyadoo markaa maankana aynu ku hayno in wax waliba duqoobaan, sidatan: **"Sidaas daraaddeed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa, haatan xukun ma laha. Waayo, qaynuunka Ruuxa nolosha ee ku dhex jira Ciise Masiix ayaa iga xoreeyey qaynuunka dembiga iyo dhimashada."**
Waxaa aayadahani ay ka hadlayaan ahmiyadda Ciise imaanshihiisa, taasoo xalisay dhibaatada dembiga ama gabowga, taasoo salkeedu yahay dembiga. Dembiga waa kan keena gabowga iyo saamaynta musuqa, ugu dambayntana waxaan u dhimanaynaa demgiga dartiis. Sida xaqiiqda ah cutubka 7aad ee isla warqaddan reer Rooma ayaa waxay ka hadlaysaa

awoodda dembiga. Dadka dunida oo dhan waxaa gumeeyey dembiga.

Waxaa jira sharciga masuuliyadda ee caamka ah. Kitaabkii Yexesqeel 18:4 ayaa looga hadlay in naftii dembaabtaa ay dhimanayso, waxaana qorniinku leeyahay: **"Bal eega, nafaha oo dhan anigaa iska leh, oo sida nafta aabbuhu ay taydii u tahay ayaa tan wiilkuna ay taydii u tahay, haddaba naftii dembaabtaa way dhiman doontaa."**

Haddaba waa wax sahlan inaan aragno waxa inaga dhigay dembiileyaal. Ugu dambaynta waan dhimannaa, waayo kaamil ma nihin. Dembiga ayaa ina kharriba oo wuxuu fariistaa nolosheenna ilaa ugu dambaynta aan dhimanno. Laakiin, Masiixa waxaa ku dhex jira, jawaab caam ah. Awoodda iftiinka Ilaah ayaa ayaa jawaab u ah dhibaatada dunida, waana xalka keliya ee dadku leeyahay.

Waa muhiim inaad garato marka Ilaah soo dirayo Ciise inaan loo soo diraynin sida nebi caadi ah oo kale, ama inuu hor gale u yahay nebi kale oo mustaqbalka imanaya. Ciise waa mid khaas ah, oo waa wiilkii Ilaah. Maahan ama kama mid ahayn fariin-waliyaasha ama rasuullada, balse Ciise waa Sayid, oo waa wiilkii Ilaah. Waxaan ogsoon nahay weedh uu isticmaalay ee ahayd in isagu uu yahay 'Wiilka Aadanaha."

Jagada 'Wiilka Aadanaha' waa mid qoduus ah waxaana ay ku qoran tahay kitaabkii Daanyeel, oo Ciise wuxuu sheegay inuu yahay kan dunida furan lahaa iyo inaanu mid kale jirin oo la sugayo. Hal baan ku xusuusinayaa! Miyaad ogsoon tahay in hal xidig oo keliya in dunida ay iftiinka ka hesho? Xidigg-aasina waa qorraxda.

Isla sidaas oo kale dunidan waxay leedahay hal bixiye, waana wiilka keliya ee Ilaah ee ina siiyey

iftiinka aqoonta Ilaah iyo runta, oo dadkuna xigmad bay helayaan haddii ay maqlaan isaga oo kulaalaan ilayska Hadallada Ilaah iyo runtiisa. Waa hadallo keenaya nolol isla sida qorraxdu ay xitaa u diiriso dadka xitaa markii xilligu qabow yahay. Ilayska qorraxda ayaa kulka oo dhaniba ka yimaadaa, oo xilliyadana iyada ayaa caadi ka dhigaysa si loo helo mirihii la beertay, oo qoraxda la'aanteed waannu dhiman lahayn. Laakiin isla sidaasi oo kale, markaan ku jirno wiilka Ilaah, xagga ruuxa ka dhiman mayno.

Taasina waa ahmiyadda ilaysku u leeyahay dunida. Waxaa kaloo ku qoran Injiilka sida Yooxanaa u qoray 1:9 sidatan: **"Kaasu wuxuu ahaa nuurka runta ah oo iftiimiya nin walba oo dunida yimaada."** Bal ogow sida loo adkaynayo runta ruux ahaaneed, oo iftiinkan ruuxa waxaa iska leh qof kasta oo aadami ah, oo waxaa qorniinku leeyahay, **"Kaasu waa nuurka runta ah oo iftiimiya nin waliba oo dunida yimaada."**

Nuurka iskama lahan dad khaas ah, laakiin waxaa leh qof kasta ee nool, oo naftu ay ku jirto. Waa qof kasta oo aragga Ilaah laga sameeyey kan u baahan iftiinka, isla sida dunidu ay qorraxda ugu baahan tahay, waana xiddigga dunideenna u dhow marka loo eego xidigaha kale. Haddaba ogow, marka aynu dembi ku dhacnay, in dembigu uu inagu hayo qararka.

Haddaba macno ma leh marka aad bohol ku jirto sida midabkaagu yahay. Micnana ma leh luuqadda aad ku hadasho, da'daada ama inaad rag ama dumar tahay. Tan aad u baahan tahay waa in marka hore godka aad ku jirto lagaa soo bixiyo. Waxaad u baahan tahay nabaadiino iyo in mar kale aad dibadda u soo baxdo. Isla sidaas oo kale, Ciise wuxuu dunida u

yimid si qof kasta oo dembi ku jira looga soo bixiyo godka dembiga iyo gudcurka daran.
Waa gudcurka ku yimid xaaladaha dembiga leh ee dadka. Imaanshihii Ciise ayaan imminka ku helnay rajada nolosha daa'imka ah. Marka la eego arrimihii aan soo taabtay, dhalashada Masiixu waxay dunida u leedahay ahmiyad sare mana ahan in lagaaga daboolo diqonnimo iyo baadinimada baahsan ee bidcada. Waxaan u baahan nahay inaan fahanno awoodda iyo ahmiyadda iftiinkaka Ilaah ee ku jirta Ciise Masiix, oo aan weliba dadka kale la wadaagno xaalka.
Waa goorma wakhtiga dhalashada Ciise? Maahan 25ka December. Dhalashada Masiixa, nolosha cusub, iyo iftiinka Ilaah wuxuu yimaadaa markii aad qaabisho Ciise Masiix. Maahan oo keliya hal maalin ee la dabbaaldego, waase nolol cusub oo dhamaystriran. Ilaah wuxuu kaa doonayaa inaad lahaato dhalashadaas farxadda leh ee Ciise, oo wuxuu doonayaa inaad lahaato iftiinka nabadda.
Waxaa laga yaabaa in gudcur lagu geliyey, iyo inaad dembi ku jirto, laakiin Ilaah wuxuu kuu hirgaliyey xaalka furashada si uu kuu badbaadiyo. U imow iftiinka Ciise Masiix, oo noloshaadana isaga u dhiib, oo rumayso. Masixu waa nabaadiinada Ilaah ee laguu soo diray. Waxaana iska leh qof kasta, waayo Ilaahw uxuu doonayaa inuu ku soo furto, oo uu ku siiyo nolol cusub si aad ugu noolaato, uguna diirsato ilayska badbaadada.

**SONG: REEL—CUT--**

Waxaa intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe

(saacadahan oo kale isla idaacaddan.) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan
P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: **0707032060.** Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Websitekayaga waxaa weeye isna twr360.org oo aad ka maqli kartaan barnaamijyada oo toos ah. Farriinta waxaad ka hor-marinaysaan, waa markaad noo soo qoraysaane, Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.